

Xidhmooyinka aad soo ku shuban karto

Laynyada Telia Prepaid waxaa laguugu diyaariyay xidhmooyin kala duwan oo isku jir ah iyo kuwo internet ah iyo inaad lacag ugu shuban karto kolba sida ay baahidaadu tahay, waxaanadd ka heli kartaa cinwaanka telia.fi/lataa.

- Lacagta aad ku shubato taleefan iyo farriimo ayaad ku dirsan kartaa waxaanad ku isticmaali kartaa internetka iyadoo kharashkoodu uu yahay sida ku qoran qiimaha.
- Xidhmooyinka iskujirka ah waxaad ku dooran kartaa daqiiqadaha iyo farriimaha adiga kugu habboon iyo inta aad u baahantahay inaad internetka ka isticmaasho. Waxaa la heli karaa xattaa xidhmooyinka oo 5G ah.
- **Xidhmaha internetka:** Si xad la'aan ah ayaad internetka ugu isticmaali kartaa Finland, waxaanad dooran kartaa muddooyin cadadkoodu kala duwanyahay. Waxaa la heli karaa xattaa xidhmooyinka 5G ah.



Kuwani waa dhowr xidhmo oo dadku jecelyihiin:

Telia Prepaid 4G netti

- Internet xad la'aan ah oo 4G ah oo ku haynaya muddo 31 maalmood ah.
- Internet xad la'aan ah oo waddanka gudihiiisa ah oo 4G ah xawaarihiisuna yahay 100M, oo wakhtiga aad ku shubato laga bilaabo ku haynaya 31 maalmood.
- Xidhmaha waxaa sidoo kale ku jira isticmaalka internetka 21 Gt ah oo Waddamada waqooyiga ah, Baltia iyo waddamo xul ah oo Miwodga Yurub ka tirsan (Ilsbayn, Jermani, Griiga, Talyaani iyo Fransiis). Wakhtiga isticmaalku wuxuu ka bilaabmayaa wakhtiga ugu horreeya ee internetka la furo.

Xidhmaha Telia Prepaid Rajaton 4G L

- Xidhmaha xad la'anta ah ee Rajaton 4G L waa mid shaqaynaya 31 maalmood.
- Taleefanka qiimihiisu caadiga yahay iyo farriimaha oo 5000 min/xabo (SMS/MMS), ugu badnaan 165 min/xabo maalintii, wuxuuna u dheer Finland inuu ka shaqeynayo Norway, Iswidhan, Denmark, Estoonya, Latfia iyo Lituwayniya.
- Internetka waddanka gudihiiisa waa xad la'aan waana 4G xawaarihiisuna waa 100M.
- Xidhmaha Rajaton 4G L waxaa ka tirsan isticmaalka internetka oo 32 Gt ah oo Waddamada waqooyiga ah, Baltia iyo waddamo xul ah oo Miwodga Yurub ka tirsan (Ilsbayn, Jermani, Griiga, Talyaani iyo Fransiis).
- Xidhmahan kuma jiraan taleefanka ama farriimaha loo diro lambarada adeegyada iyo shirkadaha.